



FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
WADAJIR DISTRICT COURT
MOGADISHU-SOMALIA

Summad: MDWAD/578/2021

TR. 22/09/2021

UJEDDO:- SUGITAAN DHAXALKOOB, CADEYN TARIKO, IYO WAKAALAD.

Maanta oo ay taariikhdu tahay 22/09/2021, Waxaa Maxkamadda Degmada Wadajir Hor Yimid Markhaatiyaasha kala ah:-

1- **Maxamed Axmed Biixi**, Somali ah, Ku Dhashay Kismaayo, Sanadkii 1967, Ina Faadumo Yuusuf Cali, oo sita Somali National ID No.26701018148055.

2- **C/fitaax Diiriye Abtidoon**, Somali ah, Ku Dhashay Cadaado, Sanadkii 1980, Ina Xaliimo Guuleed Eybakar, oo sita Somali Passport No. P01088051.

Waxayna si Wadajir ah Maxkamadda Horteeda uga Caddeeyeen in uu geeriyooday Marxuum la oran jiray **MARXUUM C/LLAHI SACIID CUSMAAN**, kuna geeriyooday Usa Sanadkii 2016, Waxay kaloo Markhaatiyaashu Caddeeyeen in Marxuumka Aabihiis iyo Hooyadiis ay Ka geeri horeeyeen, Wuxuuna ifka uga tagay oo dhaxlaya 1,Xaas, 3,Wiil, waxayna kala yihiin sidan soo socota:-

DADKA:- DADKA:-

1-Khadro	Maxamed	Rodal	Degan Xamar	Dhalatay 1953	(Xaaskii Marxuumka)
2- Maxamed	C/llaahi	Saciid	Degan Usa	Dhashay 1975	(Wiilkii Marxuumka)
3- Cumar	C/llaahi	Saciid	Degan Usa	Dhashay 1978	(Wiilkii Marxuumka)
4- Naasir	C/llaahi	Saciid	Degan Usa	Dhashay 1981	(Wiilkii Marxuumka)

Waxay kaloo Markhaatiyaashu Caddeeyeen in aysan jirin Cid kale oo Marxuumka dhaxleysa haday noqon laheyd Asal Ama Farac.

=HANTIDA LAGA DHAXLAAYO MARXMUUMKA=

Waxay kaloo Markhaatiyaashu caddeeyeen in **MARXUUM C/LLAHI SACIID CUSMAAN** uu ifka uga tagay Hal Guri dhisan iyo Dukaamo Laamiga saaran, oo ku yaal xamar Degmada **Hodan**, Soohdintiisuna tahay Bari Waxaa Ka Xiga Dhulka No.64-B, Koofur Waxaa Ka Mara Laamiga Wadnaha, Waqooyi Waxaa Ka xiga Dhulka No.52-B, Galbeedna Waxaa Ka mara Jid Cadde, Cabirkiisa Guudna uu yahay (600)-MQ, wuxuuna kala yahay 400-MQ, Dhulka 53-B Lehna W.M.L 16646 Tr. 19/03/1990 Kana Soobaxday Nootaayo Muqdisho Uuna Saxiixay Dr.Muuse Xuseen Sadiiq, & 200-MQ. Dhul Fidis . Lehna Sabarlog No.138/27/2021, Rasiid No.210827 Kana soo Wada Bexeen Dowlada Hoose Ee Muqdisho.

=WAKAALADO=

Waxay Maxkamadda Degmada Wadajir Sugaysaa In Dhaxaltooyada Kala ah 1-Maxamed C/llaahi Saciid, 2-Cumar C/llaahi Saciid, 3-Nasir C/llaahi Saciid ay Soo Wakiisheen Hooyadood **Khadra Maxamed Rodal** oo Dhaxaltooyada Ka Tirsan Sida Ku Cad Wakaalad Gaar ah Kuna Taariikhaysan 16/09/20 21 Kana Soo Baxday Notary Public Virginia uuna Saxiixay Ibraahin Ismaaciil Macow Soona Martay Safaarada Somaliya ay Ku Leedahay Washiton-Usa Waxaana Wakaaladaan Soo Wada Xaqiijiyey Wasaarada Arimaha Dibadda ee D.F. Somaliya & Maxkamada Racfaanka ee Gobolka Banaadir.

Page 1/2



Una soo wakiisheen dhamaantood in ay u maamuli karto, dhaxalkoob u samayn karto, xafidi karto, gađi karto, Hibeyn karto, Qofkasta Qismigiisa Ku Wareejin karto, dhisi karto kireyn karto, ka saari karto, saxiixi karto kaalintooda, una doodi karto una dacwoon karto oo qareen u qaban karto Maxkamadaha dalka hortooda u matali karto qof waliba qismiga uu ku leeyahay dhamaan hantida dhaxalka ah oo ay ka dhaxleen **MARXUUM C/LLAAHI SACIID CUSMAAN.**


DAMIINU MAAL

- **Maxamed Axmed Biixi & C/fitaax Diiriye Abtidoon**, Waxay Maxkamadda Ka Hor Cadeeyeen in ay Damiinul Maal Buuxa ka Yihiin, Wixii Ka Yimaada Dhaxaltooyada Sare Ku Xusan Hadii ay Dhacdo in ay Qariyaan Qof Ka Mid ah Dhaxaltooyada ama ay noqon waayaan dadka sare ku xusan Kuwii Dhabta ahaa, Masuul Buuxana ay Ka Yihiin Wixii Ka Yimaada Dhaxaltooyada Wakaalada Sare Ku Xusan Soo diray.

=SAXIIXA MARKHAATIYAASHA=

1-MAXAMED AXMED BIIXI

2-C/FITAAX DIIRIYE ABTIDOOON





= SAXIIXA WAKIILKA DHAXALTOOYADDA KANA MID AH DHAXALKA=
KHADRO MAXAMED RODAL

SUGITAANKA MAXKAMADDA.

Maxkamadda Markay aragtay Codsiga Wakiilka dhaxaltooyadda, Markay dhageysatay marag furka Markhaatiyaasha, Markay Aragtay dukumintiga Guriga uu Marxuumka ku qoran yahay, Markay Aragtay Wakaaladaha sare ku xusan, Waxay Maxkamada Degmadda Wadajir Sugeysaa geerida **MARXUUM C/LLAAHI SACIID CUSMAAN**, oo ay dhaxalkiisa leeyihiin dadka sare ku xusan oo kaliya, waxay kaloo Maxkamaddu sugaysaa in **Khadro Maxamed Rodal** oo Dhaxaltooyada Ka Tirsan ay Wakiil buuxa u tahay dhamaan dhaxaltooyadda, isla markaana ay awood buuxda u leedahay ku tasarufka Hantida ay ka dhaxleen **MARXUUM C/LLAAHI SACIID CUSMAAN**, ee sare ku xusan, Waana Sugitaan dhaxalkoob iyo Wakaalado ansax ah Waafaqsan Sharciga Islaamka iyo qaanuunka dalka, Waxaana lagu qoray diiwaanka guud ee Mucaamilaadka.

KAALIYAHA MAXKAMADDA.

C/risaaq Cali Cabdi (Caabi)



GARSOORAHA MAXKAMADDA DEGMADA WADAJIR.

Dr. Axmed Maxamed Cali



